



# City of Tukwila

Thomas McLeod, Duqa Magaalada

Waaxda Shaqada Dadweynaha - Pete Mayer, Agaasimaha (Ku meel-gaarka ah)

## Spanish

Escanee el código QR para obtener más información.

## Vietnamese

Quét mã QR để biết thêm thông tin.


## Somali

Iskaan garee koodhka QR-ka si aad u hesho maclummaad dheeraad ah



## Lead iyo copper iyo biyahaaga cabitaanka – khatar ma ugu jirtaa?

Ilaheena biyaha ma laha lead ama copper. Si kastaba ha ahaatee, lead iyo copper ayaa biyaha ku darsami kara iyaga oo kasoo gaaraya dhismaha hababka tuubooyinka oo ay ku jiraan tuubooyinka copper, alxanka lead ah, kabitaanka naxaasta ah, ama nooc kamid ah dahaarka zinc ee loo isticmaalo tuubooyinka la dahaaray iyo agabka hagaajinta habraaca dhismaha. Waaxda Biyaha ee Tukwila (Tukwila Water Department) waxay mas'uul ka tahay bixinta biyo cabitaanka oo tayo sare leh laakiin ma xakamayn karto noocyada kala duwan ee agabyada loo isticmaalo qaybaha tuubooyinka, Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Agency, EPA) ee dawlada dhexe waxay go'aamisay in nidaamyada biyaha dadweynaha looga baahan yahay inay dhammaystiraan agabka khadadka adeega macaamiisha. Sahankan xog-aruurinta ah wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa ka caawinta nidaamkaaga biyaha dadwaynaha in uu si hufan u guto waajibaadkan. **City of Tukwila Water Department waxay bilowday sahan xog-aruurin ah oo hore, waxaana la go'aamiyyay in heerka qayptaada laynka adeegu ay tahay "aan la aqoonin".** Baaritaanadii ugu horeeya ee aanu samaynay ma aanaan ku helin wax lead ah oo ku jira nidaamkeena. In kasta oo aanay suurtogal ahayn, hadana waxa suurtogal ah in lead ay lahaan karaan qalab tuubooyin ah oo kuusoo gudbiya biyaha.



## Naga Caawi inaan Go'aamino Agabka Tuubooyinkaaga

Haddii aad jeelaan lahayd inaad ka caawiso go'aaminta alaabta tuubooyinka ee gurigaaga, fadlan ku buuxi xog ururinta barta <https://www.tukwilawa.gov/waterlinesurvey> ama iskaan garee koodhka QR ee ku yaala qeybta hoose ee bogan si aad u gasho sahanka. Wuxaad sidoo kale aad ku bixin kartaa maclummaadka iimayl ahaan [jason.bates@tukwilawa.gov](mailto:jason.bates@tukwilawa.gov) ama adiga oo adeegsanaya lambarka taleeoonka **206-433-1863**.



## **Talaabooyin lagu Dhimayo Lead ee Ku Jirta Biyaha la Cabo**

Hoos waxaa ku yaal talaabooyinka lagugula taliyay oo aad qaadi karto, si gooni ah ama si wadajir ah, haddii adu walaacsan tahay lead biyahaaga la cabو. Liistada waxaa sidoo kale ku jira halka aad ka heli karto macluumaaad dheeraad ah. Looguma talagalin inay noqoto liisto dhamaystiran. Ma tilmaamayso in dhamaan talaabooyinka si isku mid ah ay u dhimiyaan leada ee biyaha la cabو.

**U isticmaal shaandheeyaha biyaha sida saxda ah.** Istimcaalka shaandheeyaha waxay dhimi kartaa lead ee biyaha la cabو. Haddii aad isticmaasho shaandheeye, waa in la xaqijiyyaa si looga saaro lead. Akhri tilmaan kasta oo lagugu siiyay shaandhada si aad u barato sida haboon ee loo xiro, loo dayactiro, oo loo isticmaalo tuubadaada iyo goorta la badalayo. Istimcaalka tuubada marka ay dhacdo ka dib waxay ka dhigi kartaa mid waxtar yar ku leh saarista lead. Biyo kulul haku furin shaandhada.

**Nadiifi hawo sii daayahaaga.** Si joogto ah uga saar oo nadiifi tubadadaada biyaha (sidoo kale loo yaqaan hawo sii daayaha). Wasakhda fariisata, haraaga, iyo waxyaabaha lead ayaa ku ururin kara hawo-qaadiyahaaga. Haddii walxaha lead ay qabsadaan hawo-mareenka, lead waxay soo gaari kartaa biyahaaga.

**Istimcaal biyo qabaw.** Ha u isticmaalin biyaha kulul tuubada cabitaanka, cunto karinta, ama ku samaynta caanaha ilmaha sababtoo lead si fudud ayay ugu milmaan biyaha kulul. Biyaha kulul kama saaraan lead biyaha.

**Biyahaaga hala baaro.** Wuxaad samayn kartaa muunad biyo ah oo lagu baaro shaybaar la ansixiyay si loo qiimeeyo heerka soo gaaritaankaaga. Wuxaad ka heli kartaa liistada shaybaarada la aqoonsan yahay websyatka Waaxda Caafimaadka (Department of Health) <https://doh.wa.gov./you-and-your-family/healthy-home/drinking-water>.

## **Saamaynta Caafimaadka ee Lead**

Soo gaarista lead ee biyaha la cabو waxay keeni kartaa saamayn caafimaad oo halis ah kooxaha da' kasta. Dhalaanka iyo carruurtu waxay yeelan karaan hoos u dhac caqliga (Intelligence Quotient, IQ) iyo feejignaanta. Soo gaaritaanka lead waxay u horseedi kartaa dhibaatooyin cusub oo xaga waxbarashada iyo dhaqanka ah ama waxay ka sii dari kartaa dhibaatooyinka waxbarashada iyo dhaqanka. Caruurta ay dhaleen haweenka uu la kulmay lead kahor ama inta ay urka leeyihiin waxay yeelan karaan khatar dheeraad ah oo saamaynahaan caafimaad daro ah. Dadka waawayn waxay yeelan karaan khataro badan oo ah cudurada wadnaha, dhiig karka, iyo kalyaha, ama dhibaatooyinka hab-dhiska neerfaha.